**Amar Guud**

Xeerka Xuuqda Aadanaha ee Maine wuxuu amraa in kuwa gurya bixiya ay oggolaadaan badanaa adeegsiga xayawaanada ee guryaha. Waxaa jira arrimo reebban, sida haddii adeegsiga xayawaan noqon waayo mid ammaan ah ama uu si saa'id ah u dhib badan yahay, laakiin waa in guud ahaan adeegsiga xayawaanada la oggolaado.

**Qeexitaanka**

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine wuxuu "adeegsiga xayawaan" ku-qeexayaa xayawaan kasta oo uu dhakhtar, khabiirka cilmi-nafsiga, kaaliye dhakhtareed, kal-kaaliye caafimaad ama shaqaale bulsheed oo sharciyaysan uu go'aamiyey in uu muhiim u yahay fududeynta saamaanka naafada dhinaca jidhka ama dhinaca maskaxda ama shakhsi ahaan loo carbiyey in uu caawiyo qof naafa ah. Xayawaanka waa la ilaaliyay haddii uu buuxinaya shuruudda qeexitaankan, ayadoon loo eegin haddii lugu magacaabo "adeegsi xayawaan" ama magac kasta oo kale, sida xayawaan caawiye ah, xayawaan dawayn, eey hage ah, ama xayawaanka taageerada dareenka. Waxaa tusaalaha xayawaanka adeegga noqon kara eey loo taba baray in uu hago qof indhoole ah ama ilaalinta miisaanka jidhka ka caawinaya qof qaba dhibaato dhinaca socodka. Waxaa kale oo xayawaanada noocan oo kale ah ka mid noqon kara bisad uu khabirka cilmi-nafsigu uu qoray qof niyad-jab qaba si ay wehel ugu noqoto. Kuwani waa tusaalooyin tiro keliya, balse adeegsiga xayawaanada waxaa loogu qori karaa ama loogu taba-bari karaa sababo badan oo kala-duwan. Waxaa kale oo dhici karta in adeegsiga xayawaanada ay nooc-kasta noqdaan (tusaale: daanyeer, shimbir) oo ayna ku koobnayn eeyda iyo bisadaha keliya.

**Aqoonsi**

Adeegsi xayawaan <u>uma</u> baahna in uu yeesho kaar aqoonsi oo gaar ah, soo sharciyeyn, diiwaangelin, ama in loo xidho astaan ama shay kale oo qorta loo sudhayo oo lagu aqoonsanayo in uu adeegsi xayawaan yahay. Qaar ka mid ah adeegsiga xayawaanada dabeecado noocan oo kale ah way leeyihiin, laakiin arrimahani khasab ma'aha in adeegsi xaywaan yeesho si uu ugu dhaqangalo Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Maine.

**Su'aalaha La oggolyahay**

Kan guriga dagganaashaha bixinaya wuxuu soo jeedin karaa su'aal ku saabsan nooca naafanimada ee jirta haddii ayna ahayn mid si cad u muuqata, waxaa kale oo uu dalban karaa caddayn muujinaysa in adeegsiga xayawaa loo qoray ama loo tababaray. Waxaa caddaynta tababarka noqon karta ficilka oo si dhab ah loo muujiyo.

**Xeerarka Isticmaalka**

Qofka leh adeegsi xaywaan waa in loo-fidiyo xeerar guriyeyn oo la mid ah kiraystayaasha kale aan adeegsiga xayawaanada lahayn. Waxaa loola jeedaa, tusaale ahaan: in aan qofka gaar looga sooci karayn ama aan laga saari karayn goobaha isticmaalka ee caadiga ah ee goobta dagganaanshaha. Waxaa kale oo sharci darro ah in mulkiilaha daartu uu diyaariyo daaro gaar ah oo ay dagayaan kiraystayaasha leh adeegsiga xayawaanada.

Waa sharci darro in qofka leh adeegsi xayawaan laga qaado lacag dheeraad ah oo uu xayawaanka ka bixinayo. Tusaale ahaan, qofka guriga bixinaya qofka ma saari karo lacag dammaanad ah oo dheeraad ah oo adeegsiga xayawaan ka bixiyo, xataa haddii uu lacag noocan ah ka qaadayo xayawaanada guri-joogta ah ee sida eeyda iyo bisadaha oo kale. Xusuusnow in adeegsiga xayawaan ma ahan xayawaank guriga joogta; adeegsiga xayawaanka waa taageere qofka naafada ah u oggolaanaya in uu helo fursad uu ku istimaalayo ugagana faa'iidaysanayo guriyeynta. Kuwa guryaha bixiya waxay dalban karaan in la siiyo waxyeellada uu adeegsiga xayawaanada gaysanayaan ( oon ahayn diirdiirmidda iyo dheeh ka gaca), hase yeeshe, waa haddii ay caadi tahay in la-dalbado lacagta waxyeellada dhacda.

## Ka-saarid

Adeegsiga xayawaanka waxaa dhismaha laga saari karaa haddii uu si toos ah halis ugu yahay caafimaadka ama ammaanka dadka kale, haddii uu burbur laxaadle ugaysanayo hantida dadka kale, ama haddii uu xayawaanku saamayn laxaadle ugaysanayo ka faa'iidaysiga guryaha ee dadka kale. Tusaale: Eeyga habeenkii sida joogtada ah u ciya iyada oo ay isku dayayaan inay seexdaan dadka kale ee guryaha kiraystay ama dadka kiraystayaasha ah ama martida qaniinaya, waxaa la oggolaan karaa in dhismaha laga-saaro. Waa inay jirto sabab xaqiiqo cad ku salaysan oo xayawaaka daaradda looga saarayo, balse ma'aha inay noqoto keliya iyada oo laga cabsanayo ama fikrad xun oo laga qabo xayawaanka qaarkood awgeed. Tusaale, eeyga leh taariikh dabeecad xumo waa loo-diidi karo soo gelitaanka daaradda ama daaradda waa laga saari karaa laakiin arrintaas looma samayn karo keliya iyada oo laga duulayo inta uu le'eg yahay ama asalkiisa. Haddii ay jiraan kiraystayaal xayawaanka ku caarooda, waxaa loo baahan karaa in dhibaatada dhammaan dadka noocaas oo kale ah la tixgeliyo, oo xayawaanka laga fogeeyo qofka ku caaroonaya, iyada oo loo oggolaanayo qofka xayawaanka leh in uu guriga soo dago

Rev. 09/ 2013

XEERKA XUQUUQDA AADANAHA EE MAINE

<u>Qeexitaan</u>
"Adeegsiga xayawaan" wuxuu macnihiisu yahay:
A. Iyada oo laga duulayo ujeeddooyinka Cutub-hoosaadka 4:
(1) Xayawaan kasta oo uu dhakhtar, khabiirka cilmi-nafsiga, kaaliye dhakhtareed, kal-kaaliye caafimaad ama shaqaale bulsheed oo sharciyaysan uu go'aamiyey in uu muhiim u yahay fududeynta saamaanka naafada dhinaca jidhka ama dhinaca maskaxda ama shakhsi ahaan loo carbiyey in uu caawiyo qof naafa ah; ama
(2) Xayawaan kasta oo shakhsi ahaan loo tababaray si uu u qabto shaqo ama uu u fuliyo hawlo uu uga faa'iidaynayo shakhsi naafada dhinaca jidhka ama maskaxda ah, oo ay ku jiraan, balse aan ku koobnayn keliya hagidda shakhsiyaadka qaba dhibaatooyin dhinaca aragga indhaha (indhoolayaal) ama dhibaatooyin dhinaca maqalka ama codadka,oo bixinayo shaqo ilaalin ama badbaadin macquul ah, ama jiidaya gaadhiga dadka naafada ah ama keenaya wax yaalaha qofka ka dhaca. . 5 M.R.S.A. §4553(9-E).
<u>Takooridda dhinaca guriyeynta ee sharci-darrada ah ee naafanimada</u>
Waa taakoorid sharci-darro ah, oo Xeerkan ku xad-gudbaysa: . . . Ee mulkiile kasta, kirayste, kirayste hoosaad, wakiil maarayn ama qof kale uu mid kasta oo wakiilkooda ka mid ah oo xuquuq u leh in uu guri dagganaansho iibiyo, kiirayo ama uu liis ku bixiyo uu diido in uu diido isticmaalka adeegsiga xayawaan oo guriga la dagayo la keensado ama in si kale ay u takooraan shasksiga naafada dhinaca jidhka ama maskaxda oo ay guriga u diidaan, haddii aan difaac lagu caddayn in isticmaalka adeegsiga xayawaanka uu halis ku noqonayo caafimaadka ama ammaanka dadka kale ama uu isticmaalka adeegsiga xayawaanka uu burbur laxaadle oo toos ah u gaysanayo hantida dadka kale ama saamayn macquul ah ku yeelanayo ka faa'iidaysiga guriga ee dadka kale. Isticmaalka adeegsiga xayawaanka shuruud loogama dhigi karo lacag la bixinayo ama lacag dammaanad ah oo la dhigayo, inkasta oo uu shakhsiga naafada dhinaca jidhka ama maskaxda qaba ay mas'uuliyadi ka saarantahay waxyeello kasta oo uu isticmaalka adeegsiga xayawaanka uu dhismaha ama guriga ugaysto. 5 M.R.S.A. §4582-A(3).

# ADEEGSIGA XAYAWAANADA EE GURIGA DHEXDIISA

# GARO XUQUUQAHAAGA & WAAJIBAADKAAGA

GOLAHA XUQUUQDA
AADANAHA EE MAINE
51 STATE HOUSE STATION, AUGUSTA,
MAINE 04333-0051

TALEEFOON (207) 624-6290
FAX (207) 624-8729
TTY MAINE RELAY 711

(207) 624-6290 PHONE
(207) 624-8729 FAX
TTY: MAINE RELAY 711

*www.maine.gov/mhrc*